Nagu Xirnow Hel Caymis

Xubnaha Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP)

Xeerarka shaqada ama hawlaha waxay bilaabmayaan 1-da Janaayo, 2027

- Xubnaha qaar ee da'doodu u dhaxayso 19 ilaa 64 jir waxaa looga baahan karaa inay buuxiyaan xeerarka marka ay codsanayaan ama dib-u-cusboonaysiinayaan
- Xeerarkan saameyn kuma yeelan doonaan dadka:
  - Aad haysato Medicare
  - Uur leedahay
  - Aad haysato OHP ku salaysan naafanimada
- **Waxaa laga yaabaa in lagaaga baahnayn inaad buuxiso xeerarka haddii:**
  - Aad qabto xaalad caafimaad oo halis ah ama naafanimo
  - Aad daryeesho ilmo ka yar 14 jir ama qof qaba xaalad caafimaad oo halis ah
  - Aad tahay Hindida Mareykanka ama Dhaladka Alaska

Wax badan ka ogow barta OHP.Oregon.gov/HR1

Maxaa lagaa doonayaa inaad sameyso:

- U cusboonaysii macluumaadkaaga xiriirka, mid ka mid ah qaababkan:
  - Booqo **benefits.oregon.gov**
  - Wac **1-800-699-9075** (wicitaanada gudbinta ah waa la soo dhaweynayaa)
  - Booqo xafiiska Oregon Department of Human Services (ODHS). Ka hel xafiis deegaanka ku yaala barta **ODHSoffices.oregon.gov**
  - Ka raadi kaaliye OHP ah barta **oregonhealthcare.gov/gethelp**
- Waa inaad sameyso mid ka mid ah kuwan si aad u buuxiso xeerarka:
  - Kasbo ugu yaraan $580 bishii
  - Inaad ugu yaraan iskuul dhigto kala-bar maalintii
  - 80 saacadood bishii oo shaqo, is-xilqaam, waxbarasho, shaqo aan mushaar lahayn, ama tababar ah

OHP waxay ku weydiin karaan macluumaad si aan u xaqiijino inaadan u baahnayn inaad buuxiso xeerarka.

OREGON HEALTH AUTHORITY | Oregon HEALTH PLAN

200-1765000_12 (09/2026) Somali